


# Sharciga Badbaadada Ilmaha ee Gobolka New York - Kursiga Badbaadada ee Ilmaha Rakaabka

## Ma Aha Wax Iqtiyaar ah, Oo Waa Sharci!

Dhammaan carruurta baabuurka saaran waa in lagu xiraa kursi ilmaha ku habboon inta baabuurka ay saaran yihiin, **ilaa ay ka gaarayaan 8 sano jir**. Kuraasta ilmaha ku habboon waa kursiga buuxinaya oo ka soo baxaya cabbirka iyo miisaanka ilmaha ee warshadii soo saartay ku tallinaysa.



\*Noocyada kuraasta ee da' kasta loogu talagalay waxay ku xiran tahay koritaanka iyo dhirirka/miisaanka ilmaha kursiga gaariga ee ilmaha iyo kursiga kor u qaadaha. Qoraalka la yimaada kursiga ilmaha rakaabka iyo qoraalka ku dhegan wuxuu kaa caawinnayaa inuu kuu tilmaamo dalabyada ku haboon iyo qaabka aad ugu xiri la'hayd iyo xaddiga dhirirka/miisaanka, iyo isticmaalka haboon ee kursiga. Haddii ilmaha ay yihiin siddeed sano jir oo dhiri ahaanna ka yar yahay 4'9" ama miisaankiisu ka yar yahay 100 lbs, waxaa lagu taliyay in aad sii wado isticmaalka kuraasta ilmaha.

### - GADAAL-GADAAL LOO JEEDIYO

#### Kursiga Rakaabka Ilmaha

**Dhalashada ilaa ay ka gaaraan Da'da 2\***

Ilmaha dib u jeesi ayaa - kursiga dambe loogu fariisiiyaa iyada oo xariga la isticmaalayo ilaa da'da 2 jir ama ilaa-iyada inta uu ka gaarayo xadka miisaanka kore ee kursiga.

(kursiga istariixa ah waxaa loo isticmaali karaa dib u jeedin iyo horay-horay u jeedin labada)

**Booska- Kursiga Xariga Dib u jeedinta**

Booska xariga lagu xiro waa inuu isbaalaha gaaraa ama ka hooseeya

Booska xariga uu ku xirmo waa xabadka/shafka inta u dhaxayso kilkilada

Xariga hoos waa inuu ku xiran yahay sinta, oo caloosha aysan ahayn

### HORAY-HORAY U JEEDINTA

#### Kursiga Rakaabka Ilmaha

**Da'da 2 ilaa ugu yaraan 5\***

Goorta ilmaha ay ka koraan kursiga dambe loogu fariisiiyaa iyada oo xariga la isticmaalayo ilaa da'da ay ka gaaraan ugu yaraan 5 sano jiro ama ilaa ay ka gaaraan miisaan kore ee kursiga. (kursiga istariixa ah waxaa loo isticmaali karaa dib u jeedin iyo horay-horay u jeedin labadaba/ kuraasta isku jirka ah waa kuraas isku jir oo loo isticmaali karo kursiga horay-horay oo xarig iyo kusiga kor u qaadaha ah labadaba)

**Booska Kursiga Horay-horay u Jeedaha Xariga leh**

Booska xariga lagu xiro waa inuu isbaalaha gaaraa ama isbaalaha ka koreeyaa.

Booska xariga uu ku xirmo waa xabadka/shafka inta u dhaxayso kilkilada

Xariga hoos waa inuu ku xiran yahay sinta, oo caloosha aysan ahayn

### KURSIGA KOR U QAADHA

**4 - 7 Sano jir\***

Waxaa lagu taliyaa in canuga la fariisiiyo kursiga dambe iyada oo lagu fariisinayo kursiga rakaabka ilmaha oo xariga leh oo warjiga hor-horey loo jeediyo ilaa canuga uu ka gaarayo xaddiga dhirir sare ama miisaan ee ay ogoshahay warshadda kursiga soo saaray.

Goorta ilmaha ay ka waynaadaan kursiga rakaabka ilmaha oo horay-horay loo jeediyo ee xariga leh, u wareeji in aad ku fariisiso kursiga kor u qaadaha ah, iyaga oo kursiga dambe ee baabuurka la fariisiiyo. (Kuraas is wata waa kuraas is wata oo horey-horey u jeeda oo wata xarig iyo kursi kor u qaadaha)

**Booska Suunka Kursiga Kor U Qaadaha:**

1. Suunka la xirto waa inuu kor ugu soo gudbaa isbaalaha iyo xabadka/shafka oo ma aha inuu soo maro qoorta ama wajiga.

2. Suunka laabta waa inuu kor ugu soo gudbaa cajar kore oo (ma aha caloosha).

**Rakibid\***

Kuraasta kor u qaadaha waxay isticmaalaan suunka kursiga si ilmaha loogu xiro oo uuna suunka ilmaha uusan u qaban qoorta iyo wajiga canuga uu kor u qaado oo uu fariisiiyo boos ka reeba in suunka caloosha uusan ka qaban.

Haddii kursiga kor u qaadaha xirig ku xiran yahay xirigaas baabuurka kula xir.

### SUUNKA KURSIGA

**8 - 12 Sano+\***

Suunka ammaanka ee baabuurkaaga ku xiran carruurta loogu ma talagalain. Si haboon u isticmaalkooda waxay tilmaamaysaa in carruurta ay ammaan yihiin haddii la isticmaalo kursiga ilaa suunka fadhiga si sax ah oo haboon loogu xiro.

**Suuamnka Kursiga Wuxuu Juusto Noqdaa Goorta:**

1. Suunka la xirto waa inuu kor ugu soo gudbaa isbaalaha iyo dhabta korkeeda. oo ma aha inuu soo maro qoorta ama wajiga.

2. Suunka laabta waa inuu kor ugu soo gudbaa cajar kore oo (ma aha caloosha).

3. Carruurta dhirir ahaan noqdaan kuwa si istariix ah jilibkooda u laabi kara qarka kursiga dambe ee kursiga baabuurka oo dhabarkooda ku soo jeeda.

Waxaa xooga lagu talinayaa in dhammaan carruurta jira 12 iyo kuwa ka yar baabuurka ku fuulaan kursi dambe oo si bahoob u xiran.

**Rakibid\***

Kursiga ilmaha rakaabka ee dib u jeeda waa in lagu xiraa kursiga baabuurka iyada oo lagula xirayo suunka kursiga baabuurka ama qalabka hoose ee lagu xiro. Kuraasta rakaabka ilmaha ee si haboon loogu xiray waa inuusan ka dhaqaaqin in ka badan hal inji oo dhinac ilaa dhinac ah iyo horey ilaa gadaal-gadaal ah.

Marnaaba canuga rakaabka ah ha hor fariisinbacda hawada [air bag] ga kursiga horey ku jirta.

**Rakibid\***

Kursiga ilmaha rakaabka ee horey-horey u jeeda waa in lagu xiraa kursiga baabuurka iyada oo lagula xirayo suunka kursiga baabuurka ama qalabka hoose ee lagu xiro iyo xariga, hadduu jiro.

Kuraasta rakaabka ilmaha ee si haboon loogu xiray waa inuusan ka dhaqaaqin in ka badan hal inji oo dhinac ilaa dhinac ah iyo horey ilaa gadaal-gadaal ah.

Marnaaba canuga rakaabka ah ha hor fariisinbacda hawada [air bag] ga kursiga horey ku jirta.

Qofkasta oo baabuurka saaran, iyada oo aan da' ama kursiga ay fadhiyaan aan loo eegeyn waa inay xiran yihiin suunka badbaadada. Rakaab kasta oo ka yar 16 sano jir waa inuu suunka kursiga xirtaa ama waa inuu isticmaalaa suunka badbaadada ilmaha waa inuu xirtaa. Darowalka waa inuu hubiyaa in rakaab kasta oo ka yar 16 sano jir dhowraa sharciga. Darawalka waxaa la ganaaxi karaa \$25 ilaa \$100 doolar oo sidoo kale gef kasta ee uu sameeyo waxaa la ganaaxi doona isagoo dhibacyo laga jarao shatigiisa baabuurka.

**TS.CPS.2018.Somali.CPS Seat Chart Flyer 11 x 17**

Child passenger seat recommendations: American Academy of Pediatrics Safety Committee. Graphic design: adapted from National Highway Traffic Safety Administration. This flyer was modified Aug 2017 by Mohawk Valley Resource Center for Refugees with recommendations from the New York State Governors Traffic Committee. Translations provided by **Tone** at [www.tonetranslate.com](http://www.tonetranslate.com) a division of Mohawk Valley Resource Center for Refugees. This project is made possible through the Mohawk Valley Resource Center for Refugees' Child Passenger Safety program funded by the National Highway Traffic Safety Administration with a grant from the New York State Governor's Traffic Safety Committee.